Khamiis, 5 Febraayo 2026

(10.30 subaxnimo)

SIR ROSS CRANSTON: Hagaag, subax wanaagsan, dhammaan, kuwiina qolkan jooga iyo kuwiina iga daawanaya khadka tooska ah. Magacayga waa Ross Cranston. Kani waa gunaanadkii Dhegaysiga Baaritaankii Cranston. Warbixintayda waxa saaka horraantii la horgeyay waxa hadda laga helayaa websaydka. Ujeedka ugu wayn ee dhegaysigu waxa waaye gunaanadka warbixinta iyo soojeedinaha aan sameeyay. Waxaan sidan dadwaynaha ugu soo gudbinaynaa isla sababta dhammaan Dhegaysiyada looga dhigay kuwa dadwaynaha u furan, si arrimaha bulshadu ka walaacsan tahay, kuwaas oo bud dhig u ahaa Ujeedka Baaritaanka, loogu tixgeliyo qaab furan oo daah furan. Sidoo kale isla sababtaas darteed, dhegaysigan, si la mid ah dhammaan dhegaysiyada kale ee Baaritaanka,toos ayaa loo baahinayaa si qaabka Baaritaanku u socdo ay dadka danaha ka leh shaqadeena si fudud ula socon karaan.

Shaqadaasi, dabcan, waxa diiradda lagu saaray dhacdooyinka masiibada ahaa ee dhacay 23-da illaa 24kii Noofeembar 2021, markaas in ka badan 30 qof dhinteen iyagoo isku dayaya inay ka soo gudbaan Gacanka Ingiriiska iyagoo ka yimi Faransiiska oo saarana doon yar. Tani waxay ahayd dhacdadii ay ku dhinteen nafihii ugu badnaa ee isku hal doon ah Kanaalka dhexdiisa illaa iyo markii dhibaatada doomaha yaryar la

arkay sannadkii 2018.  Shuruudaha Tixraaca Baaritaanka ayaa igu waajibinaya inaan baadhitaan ku sameeyo dhacdooyinka si, marka hore loo ogaado cidda ay ahaayeen dadkii dhintay, marka labaadna, goorta, goobta iyo xaaladda ay ku ku dhinteen, iyo marka saddexaad, in la tixgeliyo casharada laga baran karo dhacdooyinkaas iyo, haddii ay habboon tahay, in la sameeyo soo jeedinayo lagu yaraynayo in khatarta dhacdadan oo kale dib ugu dhici karto.

Ka hor inta aanan soo koobin gunnaanadka warbixinta iyo talobixinaha aan ku soo jeediyay dhammaadka baadhitaanka, waxan jeclaan lahaa inaan wax ka idhaahdo qaabka aan aniga iyo kooxdaydu u guda galnay hawsheena tan iyo magacaabistaydii oo ahayd illaa laba sano ka hor Janaayo 2024.  Qodobka ugu horreeya ee aan xusayo waa in inta uu kooban yahay baaritaanka ay xaddideen Dukumeentiga Xilka iyo Waajibaadka.  Waxa si khaasatan ah diiradda loogu saaray dhacdooyinkii 23-da illaa 24-ta Noofeembar 2021.  Baaritaanku awood uma laha inuu dhexgalo oo baaro arrimaha la xiriira doomaha yaryar ee guud ahaan soo gudba, mana dhex gali mawduucyo siyaasadeed,bini aadantinimo iyo sharciyeed oo hawlahaas khuseeya.  Dabcan, waa wax ay tahay in si faham intan ka fiican iyo fiiro intan ka ballaaran loo yeesho.

Marka xigta, waa inaan ku adkaystaa markale, maadama qodob muhiima ay tahay, in tani ahayd Baaritaan madaxbannaan-- kana madax bannaan Dowladda iyo hay'adaha

dadwaynaha ee kala duwan ee aanu baarnay intii hawsheenu socotay.  Marka saddexaad, waxa uu ahaa Baaritaan aan sharci-dejintu waajibin. Sidaas darteed, dhammaan su'aalaha ku saabsan hab-dhaqanka Baaritaanka iyo nooca hababkiisa iyo habraacyadiisa mas'uuliyad aniga ii taal Guddoomiye ahaan, iyadoo dabcan la raacayo mabaadi'da sharciga ee khuseeya gaar ahaan waajibka sareeya ee ah in si cadaalad ah loo dhaqmo. Iyadoo laga duulayo middaas, su'aasha guud marwalba hagaysay go'aamadayda waxay ahayd, "Maxaa sida ugu fiican uguna waxtarka badan Baaritaanka uga caawin kara shaqadiisa si ay iigu suurtogasho inaan gutto shaqada dukumeentiga Waajibaadka iyo Xilalku iga rabo?"

Taasi waxay i geynaysaa qodobka muhiimka ah ee xiga. Geeddi-socodka Baaritaanku wuxu ahaa mid xaqiiqo-raadin ah ee muu ahayn mid dacwayn ah.  Baaritaanku ma laha wax dhinacyo ah ma jirto cid kiis soo jeedisay ama eed iska difaacaysa. Intaas waxa dheer, wax awood aha umaan lahayn inaan go'aamiyo wax qaan ah, ha noqoto mid madani ah ama mid ciqaaba.  Taas beddelkeeda, ujeedada Baaritaanku waxay ahayd raadinta runta. Doorka dhammaan dadkii na caawiyay intaan baaritaankeena wadnay wuxu ahaa inay naga caawiyaan xaqiijinta xaqiiqada wixii dhacay habeenimadii 23-da illaa 24-ta Noofeembar 2021.

Si aan gunaanad uga soo saarno su'aashaas aasaasiga ah, aniga iyo kooxdaydu waxaan sameynay baaritaan qoto dheer

oo dacal dheeraaday. Tusaale ahaan, waxaanu gacanta ku dhignay kumanaan bog oo xog ah oo la xiriira shaqadeena kuwaas oo aanu ka helnay ashqaas iyo ururo. Waxaanu intaas kadibna xogtaas la wadaagnay cidda aanu is nidhi dan dhow baa kiiska Baaritaanka kaga xiran,kuwaas oo aanu ugu wici doono Ka-Qaybgalayaasha Buuxa. Kadib markii aan lafagurnay xogta aan helnay, waxaan caddaymo la xiriira dhacdooyinka la baarayo ka helnay in ka badan 70 markhaati oo dad iyo hay'ado isugu jira. Waxaanu sidoo kale la xiriirnay khubaro si ay noogu diyaariyaan warbixino ku saabsan waxyaabaha la xiriira baaritaanka waxana aanu bayaanadaas iyo warbixinada khubarada la wadaagnay Ka-qaybgalayaasha Buuxa. Waqtigii ku habboona, xogtan waxa la soo dhigay websaydkeena, halkaasoo qoraalka oo dhammeystiran iyo muuqallada dhegaysigayaga laga heli doono.

Shaqada adag ee bilooyinka qaadatay ee ay qabteen kooxdaydu, iyo wada shaqeynta heerka sare ah ee hawsha ee la yeelanay Ka-Qybgalayaasha Buuxa iyo kuwo kaleba sida RNLI darteed, waxaa noo suurto gashay inaan biloowno Dhegaysigeena biloowga bisha Maarso ee sannadkii la soo dhaafay waxana aanu awoodnay in aanu ku soo gebogebayno afar todobaad gudahood. Muddadaas, waxaan marag ka dhegaysanay 22 markhaati, kuwaas oo ay wareysteen shaqaalaha Looyarada Baaritaanka iyago i metelaya. Waxaan sidoo kale dhageystay soo-jeedinnada furitaanka ee Looyarrada Baaritaanka iyo soo-jeedinnada

furitaanka iyo xiritaanka ee ay sameeyeen Looyarrada matalayay Ka-Qaybgalayaasha Buuxa.

Toddobaadyadii ugu dambeeyay ee Dhagaysiyada Buuxa, waxaan dhageystay caddaymaha saamaynta ee ay bixiyeen xubnaha qoysaska qaar ka mid ah dadkii dhintay. Hadalladaas waxaa lagu duubay luuqadaha u gaarka ah xubnaha qoysaska, waxaana codadka la duubay laga dhex daaray qolka dhagaysiga. Xubin ka tirsan kooxda Baaritaanka ayaa raaciyay duubid kasta aqrin lagu akhriyayo luuqadda Ingiriisiga. Waxaan markale u mahadnaqayaa caddaynta ay bixiyeen xubnahaas qoysku. Qayb ka mid ah warbixintayda ayaa gaar loogu asteeyay dadkii ku dhintay masiibada Kanaalka iyo saameynta ay ku yeelatay nafaha dadka.

Taasi waxay ahayd qayb si joogto ah uga dhex muuqatay habraaca Baaritaanka. Mar walba waxaan isku daynay inaan qoysaska dadkii dhintay ka dhigno udub-dhexaadka shaqadeena, waxaana had iyo jeer ku dadaalnay inaan maanka ku hayno in dadkii naftooda ku waayay 23-da ilaa 24-ta Noofambar 2021, iyo eheladooda iyo saaxiibadoodaba, tani u tahay, wax kasta ka hor, musiibo bini'aadantinimo oo aan la qiyaasi karin.

Intaanan u jeedsan dhanka warbixinta, waa inaan ka hadlo laba arrimood oo muhiim ah oo kale. Ta koobaad waxay la xiriirtaa Waaxda Baaritaanka Shilalka Badda (Marine Accident Investigation Branch, MAIB). Ka dib dhacdada, MAIB waxay baaritaan ku bilowday arrinta. Warbixintooda waxa la daabacay 8-dii Noofeembar 2023, dhowr bilood ka hor markii

magacaabistayda lagu dhawaaqay ee Baaritaankani bilaabmay. Baaritaankaygu wuxu lahaa xilal ka duwan midka MAIB. Tusaale ahaan,shaqada MAIB kumay jirin inay ka jawaabaan su'aalaha la xiriira dadkii dhintay. Sida aan muujiyay, qodobkani aasaasi ayuu u ahaa shaqada Baaritaanka.

Hase ahaate, Xilka iyo Waajibaadka la ii dhibay waxay si khaas ah ii farayaan inaan tixgeliyo baaritaanka MAIB. Aniga iyo kooxdayduba si taxaddar leh ayaan taas u sameynay oo marar badan ayaanu adeegsanay intaan ku jirnay baaritaanka. Intaa waxaa dheer, sida aan sharxi doono, mid ka mid ah talooyinkayaga ku jira qaybta ugu dambaysa ee warbixinta ayaa waxay la xiriirta baahinta ballaaran ee tallaabooyinka fulinta ee ay dhinacyadu hirgeliyeen iyagoo ka jawaabaya talooyinkii ay MAIB soo saartay baaritaan ka dib.

Arrinta labaad ee aan rabo inaan kaga hadlo marxaladdan waxay la xiriitaa doorka Maamulka Faransiiska. Kadib dhacdooyinkii 23-di ilaa 24-kii Noofambar 2021, maamulka Faransiisku waxay bilaabeen baaritaan dembiyeed ka dhashay dhacdadaas, kaas oo uu hoggaaminayo xaakim baaritaan. Baaritaanku waxa uu ka codsaday Xeer-ilaalinta Paris in loo oggolaado caddaymaha lagu helay baaritaanka Faransiiska, balse waxaa nalagu wargeliyay in taasi aysan suurtagal u ahayn sababo la xiriira mabda'a sirta garsoorka. Xeerka ciqaabka Faransiiska ayaa waajibinaya inay sir ahaadaan dhammaan xogta la xidhiidha baadhitaanada noocan ah. Natiijadu waxay noqotay

uu heli kari waayay xogta la xiriirta baaritaanka socda ee Faransiiska.

Hase ahaatee, Xeer-ilaaliyaha Paris i xushmad leh Baadhitaanka u siiyay aqoonsiyada dadkii dhintay iyo kuwa maqan ee laga yaabo inay saarnaayeen doonta yar. Aan ku daree, Baaritaanku Maamulka Faransiiska wuu ku wargeliyay shaqadeena socota.

Hadda waxaan ku laabanayaa warbixinta. Ugu horrayn, aan wax ka dhaho bilaabista qabyo-qoraalka habraaca baaritaanka. Ka dib markii la soo gebogebeeyay Dhegaysiga Buuxa bishii Maarso ee sannadkii hore, ayaanu aniga iyo kooxdaydu bilownay qabyo-qoraalka warbixinta. Marxaladaas,waxaanu caddaymo ka raadinay tiro dhinacyo ah ka dib markii arrimo ka soo dhex baxeen Dhegaysiga Buuxa. Xagaagii sannadkii hore, markii warbixinta qabyo-qoraalka ah gaadhay marxalad sarreysa, Baaritaanku wuxu tafaasiil naqdin ah u gudbiyay hay'adaha arrintu toos u saameynaysay. Waxaanu sidoo kale la wadaagnay talo-soojeedino hordhaca ah, annagoo ku martiqaadnay inay faallo ka baxshaan awoodooda iyo siday uga hawlgeli karaan. Kadib markii aan qiimeynay jawaabaha labada kiisba, waxaan wax ka beddelis ku sameeyay warbixintii asalka ahayd si aan ugu daro waxyaabo aan u arkayay soojeedino waxtar leh iyo jawaabo macquul ah oo ku aaddan naqdinta sharci iyo talo labadaba.

Waxa jira tiro mabaadi' ah oo aan tixgelin siiyay

intii aan warbixinta soo saarayay. Ugu horrayn, sida aan horay u sheegay, awood uma lihi mana aan raadin wax dambi ciqaabeed ah ama madani ah. Taas beddelkeed, shaqadaydu inaan helo xaqiiqada wixii dhacay 23-dii illaaa 24-tii Noofeembar 2021 iyo inaan bixiyo talooyinka aan u arkay inay habboon yihiin marka la fiirsho hawlaha Baritaanka iyo gunaanadka ku aadan xaqiiqooyinka.

Ta labaad, marka la fiirsho nidaamka xaqiiqo-raadinta ee Baaritaanka, muu jirin culay caddaymeed iyo habraacyo go'an oo tixraac ahaan xogta lagu dhisayo. Waxaan qaatay qaab debecsan marka go'aan ka gaarayay in dhacdo dhacday in aanay dhicin. Xaalado badan, caddayntu waa mid waadax ah oo shaki kuma jiro in dhacdo gaar ahi dhacday. Marar kale, go'aankaygu waa in ay u badan tahay in dhacdadu dhacday,ama taas beddelkeeda, waa suurtogal in dhacdadu dhacday. Xaalado kooban, hubanti la'aan ayaa sii jiraysa, aragtidayda , tani waxay saameyn ah kuma leh arrinta bud-dhiga u ah Baaritaanka.

Ugu dambeyn, markaan go'aanka gaarayay, waan ku baraarugsanaa khataraha ka dhalan kara dib u milicsiga markaan tixgelinayo ficilada dadkii ku lug lahaa dhacdooyinkaas habeenkii. Inkastoo aan aqoonsaday waxyaabo ay ku fasilmeen

dadkii habeenkaas shaqeynaya, midkastoo ka mid ah waxaan tixgeliyay anigoo u eegaya xogta la hayay markaas, agabka diyaarka ahaa,diyaargarawga la sameeyay, iyo habraacyada dejisnaa.

Guud ahaan, gunaanadkaygu waa in sababuhu ahaayeen kuwa dabciya nidaami ah, xitaa meelaha fashilka lala xiriirin karo ama ay suurtogal tahay in lala xiriiriyo ashqaas.  Lafagurka kuwan oo dhammeystiran wuxu macluumaad aasaasi ah ka bixinayaa warbixinta.

Warbixintu waxay ka kooban tahay in ka badan 450 bog.  Ka hor inta aanan soo-koobid kooban ka bixin gunnaanadka iyo soojeedinaha,waa inaan marka hore dhahaa, si aad si buuxda ugu fahamot oo uga wada bogato natiijooyinkiisa, ma jirto wax ka habboon in la wada akhriyo qoraalka oo dhan.  Hase yeeshee, waxaanu bilowga warbixinta ku bixinay Sookoobid 15 bog ah.

Qodobka muhiimka ah in lagu nuuxnuuxsado waa in waxa ku qoran qaybtaas sida magaceeda ka cad uu yahay warbixinta lafteeda oo aad loo koobay, lagana jaray tafaasiisha iyo caddaymaha oo sidoo kale aan wadan sababaha faahfaahsan ee aasaaska u ah gunaanadka.

Maadaama aan taas isla meel dhignay,aan u jeedsado su'aasha koobaad ee ku cad Xilka iyo Waajibka la ii idmaday, taas oo ah yay ahaayeen dadkii ku waayay nafahooda Gacanka 23-da

illaa 24-ta Noofeembar 2021?

Baaritaanku wuxuu ku guulaystay inuu si kalsooni leh u go'aamiyo aqoonsiyada 26 ka mid ah 27ka qof ee dhacdada ku dhintay, iyo afar qof oo la aaminsan yahay inay doonta saarnaayeen oo la waayay. Inkastoo aqoonsiga qofka 27aad kaas oo maydkiisa la helay aan si kalsooni leh loo xaqiijin karayn, Baaritaanku wuxu awooday inuu qiyaaso aqoonsigiisa. Warbixintu waxay sidoo kale aqoonsatay laba qof oo ka badbaaday dhacdada. Mid ka mid ah ayaa caddayn ka bixiyay Dhegaysiga Buuxda.

Marka tan lagu saleeyo, waxa doonta saarnaa ugu yaraan 33 qof--rag, dumar, iyo carruura--doontaas oo ka soo baxday Faransiiska fiidnimadii 23ka Noofeembar 2021. Baaritaanku ma hubo in aanay jirin dad kale oo doonta saarnaa, sida carruur kuwaas oo laga yaabo inay qoysaskoodu aanay heli doonin raq iyo ruux midna.

Warbixinta inteeda ugu badan -- xaqiiqatan dhammaanteed marka laga reebo cutubka koobaad iyo ka u dambeya -- waxa loo huray su'aalaha haray ee ku qoran Xilka iyo Waajibaadka baaritaanka,khaastan, halka iyo xaaladda ay dadka dhintay nafahooda ku waayeen? Si aan hordhac uga baxsho gunaanadka ka soo baxay su'aalahaas, waxaan filayaa inay roon tahay inaan sharraxaadda ugu kooban ka baxsho wixii dhacay fiidnimadaas.

Waxaan ka soo bilaabi karnaa markii mukhalasiintu

ka soo direen doon badda u diyaar ahayn xeebka Faransiiska qiyaastii 9kii habeenimo ee 23-kii Noofeembar 2021. Waxa saarnaa, sidaan sheegay, ugu yaraan 33 qof. Waxay ku jireen xaalad tan dhaaf iyo isdulfuul ah. Waxay mukhalasiinta siiyeen kumanaan bown si boos looga siiyo doonta waxana looo ballan-qaaday in si aammaan ah loo geyn doono Waddanka Ingiriiska. Kaliya laba qof ayaa ka badbaadi doona dadkii doonta soo raacay.

Hadda ma xaqiijin karno wixii sababay inay doonto dhacdo. Hase ahaatee, qiyaastii saddex saacadood markay safarka kuu soo jirtay, ayay doontu bilowday inay soo galaan biyo aad u badan muddo kadibna way dhaansantay. Rakaabkii waxay isku dayeen inay biyaha ka dhuraan wayna ku fashilmeen waxayna direen taleefano wicitaan cabsi ku dheehan oo caawimo raadin ah. Mid ka mid ah ayaa wacay mukhalas safarkooda u soo agaasimay wuxuna u sheegay halkay marayaan. Wax ficil ah oo uu dadka ku caawinayo muu sameyn.

Wax yar ka dib 1-dii habeenimo ee 24-ka Noofeembar 2021, Ilaalada Ingiriiska ayaa waxa soo wargeliyay Ciidamada Xeebaha Faransiiska una sheegya in doon yar oo u jirta illaa nootikaal mayl barkii Kanaalka jirto ayna saaran yihiin 33 qof.

Ciidadama Ilaalada HM waxay dhacdada u bixiyeen "Charlie". Waxyar intaas ka dib, maamulka Faransiiska ayaa soo gudbiyay wicitaan moobil oo u soo dir qof 16-jir ah oo doonta saarnaa.

Wuxu la hadlay Ilaalada Xeebaha HM qiyaastii 20 daqiiqo. Wuxu sheegay inay "biyaha ku jiraan" una baahan yihiin caawimo degdega ah. Macluumaadka goobta ay ku sugan yihiiin ayaa intaas ka dib loo diray Ilaalada Xeebaha HM taasoo muujinaysay in doontu joogtay aagga Sandettie ee Gacanka, ku dhow xariiqda kala qaybinta laakiin soo xigta xagga Ingiriiska.

Wicitaano iyo farriimo kale oo quus ah ayaa laga soo diray doonta masiibaysan inkastoo wicitaanada iyo farriimaha qaar aan la qaban. Ilaalada Xeebaha HM waxay direen baaq gurmad oo degdeg ah laakiin doon Faransiis ah oo u dhaway, Flamant, kamay soo jawaabin. Isla markaas, qiyaastii 1.30 habeenimo, ayay Ilaalada Xeebaha HM amreen doonta Ciidama Xuduudaha, ee Valiant. Valiant kamay bixin dekedde Dover illaa 2.22 habeenimo waxayna ku qaadatay saacad kale inay gaaraan meesha u dambeysay ee lagu ogaa kiiska "Charlie". Waxyar ka hor 3 habeenimo, ayay Ilaalada Xeebaha HM amareed, helikabtarta R163, markaas oo Valiant weli sii socoto.

Markay Valiant timi aagga Sandettie qiyaastii 3.24 habeenimo, way heli kari wayday doonta. Xogta goobta doontu joogtay waxa ilaalada xuduudaha lo soo gudbiyay saacad iyo badh ka hor, markaas markay Valiant soo gaartay, waxay u muuqataa in doonta yar mawjaduhu qaadeen. Intii u dhexaysay 3.30 iyo 7.20 subaxnimo, helikabtarta iyo Valiant waxay heleen saddex doomood oo yaryar. Valiant waxay soo qaadday 98 qof

guud ahaan. Doomaha la helay midkoodna may lahayn astaamihii dhacdada "Charlie".

Waagu wuxu baryay 7-dii subaxnimo mid ka mid ah dadkii badbaaday ayaa Baaritaanka u sheegay markii qorraxdu biyaha ka soo baxday, waxa jiray weli dad ku dhegan haraaga doonta yar. Maydadka dadkii kalena biyahay kor sabbeynayeen. Wuxu xusay inay jirtay hooyo qaylinaysa oo raadinaysa carruurteeda. Markan, helikabtartii wey laabatay oo degtay Valiant iyadana waxay ku laabatay dekedde Dover ee ay ka soo baxday iyadoo wadda 98 qof. Ma jirin cid Ingiriiska joogta oo raadinaysay doonta yar, mana ay jirin cid u soo gurmanaysay.

Qiyaastii 12.30 duhurnimo ee maalintaas, 24-ka Noofeembar doon Faransiis ah oo marays illaa meel illaa 9 mayl u jirta xeebta Calais ayaa heshay kiiu horeeyay ee maydadka biyaha kor sabbaynayay. Ilaalada Xeebaha HM waxa la soo wargeliyay 1-dii duhurnimo, qiyaastii 12 saacadood ka dib markay heleen wicitaankii u horreeyay. Ugu dmabeyntii, maydadkii dadkii saarnaa doonta yar waxa loo gudbiyay Faransiiska laba qofna waa la soo badbaadiyay.

Tani, sida aan sheegnay, waa dulkaxaadiska wixii dhacay habeenkaas,laakiin waxaan isleeyahay waxa iyana roon inaan sharraxo sababta Baaritaankan loo sameeyay.

Qaybta 3aad, cutubka 8aad ee warbixinta ayay ku qoran tahay warbixinta waxa habeenkaas dhacay oo faahfaahsan

lagalana soo baxay xogta dukumeentiyeed ee aadka u badan ee la helay kuwaas oo aniga iyo kooxdaydu aanu tixgelinay intii baaritaankeenu socday.

Si hawsha si fiican oo baraan deg leh loogu gogol xaaro, cutubyada hore ee warbixinta, cutubyada 2 illaa 7, waxay ka hadleen nidaamka iyo waajibaadka sharci ee Ingiriiska ka saaran smatabixinta dhanka badda. Cutubadaasi waxay intaas kadib bilaabeen inay sharxaan taariikhda doomaha yaryar ee soo gudbya illaa markay soo shaacbaxeen 2018 waxayna aqoonsadeen caqabadaha raadin iyo samatabixineed ee ay keenaan. Cutubadani sidoo kale waxay qeexayaan hay'adaha muhiimka ah ee Ingiriiska iyo Faransiiska ka falcelinta doomaha yaryar ka hor intaanay ka hadlin siday dowladda Ingiriisku u wajahday caqabadaha tirada badan ee ka dhashay tirada doonyaha ee kordhaysa ee soo gudbaya sannadadii dambe iyo nidaamyada gaarka ah ee u meel yaallay ka hor Noofeembar 2021.

Ka dib markii si faahfaahsan loogu sharraxay wixii dhacay habeenkaas cutubka 8, warbixinaha ku qoran cutubada 9 illaa 12waxay falanqaynayaan wixii dhacay iyagoo la fiirinayo agabka iyo cududada ay haysay dowladda Ingiriisku si ay u bixiso adeegyada raadinta iyo samatabixinta habeenimadaas ka hor intaan la fiirin jawaabcelintii koobaad ee laga baxshay dhacdada "Charlie" iyo qaasatan, macluumaadka laga helay sababta baaqeeda gargaar dalbasho. Cutubada xiga waxay falanqaynayaan raadinta

loo sameeyay keeska iyo waxyaabaha keenay go'aanka khaldan ee sheegay in doontii yarayd ee la xiriirtay dhacdada "Charlie" la soo badbaadiyay.

Marka laga hadlayo falanqaynta, waxaan idinku adkaynayaa in tafaasiisha buuxda ku taallo warbixinta lafteeda. Cutubka 15aad ee warbixintu wuxu go'aaminayaa in dhimashooyinka dhacay habeenkaas iyo subaxnimadii xigtayba laga hortagi karo. Isagoo aad loo dulkaxaadiyay, falanqayntu waxay u dhacaysaa sidan.

Ugu horrayn, waxaan aqbalay gunnnaadka iyo go'aanka MAIB iyo warbixintooda odhanaysa:

"Markii ay soo saareen doon aan ku habbooneyn oo aan wadan qalab badbaado oo ku filan kuna so buux dhaafiyeen 33 qof doonta, dadkii soo qabanqaabiyay isku-dayga kanaalka loogu soo gudbayo ayaa dadkii doonta saarna khatar wayn geliyay".

Marka labaad, khabiirka dhanka badbaadista ee Baaritaanku wuxu go'aamiyay in dadkii doonta saarnaa ee ka badbaaday biyaha qaboow markay biyaha galeen ugu dambeyntii waxay qarqoomeen markay sii xejisan kari waayeen haraaga doontii yarayd ee sabbaynaysay. Taas waxa sababi karay inay jir ahaan taag gabbeen ka dib markii faraha, gacmaha iyo lugahood barafoobee, inay miyir doorsamee, ama in wadnuhu istaagay markii heerkulka jirkood aad hoos ugu dhacay.

Sidaas darteed, waxa suurtogal ah in dadka intooda badani

weli noolaayeen markii doonta Ciidamada Xuduudaha Valiant timi goobta Baaqa Gurmada qiyaastii 3.24 habeenimo ee 24-ka Noofeembar 2021. Waxaan sidoo kale ku raacsanahay in qaar ka mida rakaabku weli noolaayeen qorrax soobaxii 7-da subaxnimo ee maalintaas, inkastoo ay dhinteen intii u dhexaysay markaas iyo waqtiga samata-bixinta ee subaxnimada hore ee maalintaas. Waxaan xusayaa siday isu wafaqsan yihiin fikirka khabiirka iyo caddaynta midka mid ah badbaadayaasha. Wuxu Dhegaysiga Buuxa u sheegay in ka dib markay biyaha galeen iyo in illaa 10 qof weli noolaayee illaa subaxnimadii.

Midda saddexaad, sida Ilaalada Xeebaha HM ka walwalsanayen, waxaan si taxaddar leh u qiimeeyay xaaladda shaqaalaha ee Maritime Rescue Coordination Centre -- the MRCC -- ee Dover iyo saameynta ay ku yeelatay waxyaabihii dhacay habeenkaas.

Cillado khaas ah oo dhanka samatabixinta ah ayaa si joogto ah loogu arkayay Ilaalada Xeebaha HM. Waxa si muuqata loola xiriiriyay khataro, ay ka mid yihiin naf waayis jawaabta celin liidata, ka warqab la'aan xaaladeed, iyo saameyn wayn oo soo gaartay fayoqabka iyo mooraalka shaqaalah. Xaqiiqadu waxay ahayd in shaqaalaha joogay Dover hawluhu tan dhaafiyeen habeenkii 23-da illaa 24-ta Noofeembar 2021. Sida aan sheegay, Ilaalada Xeebaha HM way ka warqaben cilladaha iyo khataraha. Baaritaanku wuxu helay caddayn aad u yar,waa haddii ay jirabee, oo sheegaysaa in

arrintaas wax laga qabtay ka hor Noofeembar 2021.

Waxaan sidoo kale go'aamiyay in komeerka ay Wasaaradda Gaadiidku ku sameyo Hay'adda Badda iyo Illaalada Xeebaha oo isalamarkaana MCA-ga HM aan si habboon loo kormeerin ka hor iyo ka dib Noofeembar 2021. Haddii aan la helin kormeer wax ku ool ah, illaa xadka baahi loo qabo si ku filan looma aqoonsan waxna loogama qaban.

Markaan u jeedsano hawlaha raadinta iyio samatabixinta habeenkaas, waxaan si gaar ah u xusayaa laba qodob. Mid Baaqii Gurmadaka ee Ilaalada Xeebaha HM go'aansadeen inay siidaayaan 2.27 habeenimo ee 24 Noofeembar. Tani waxay muujinaysaa in doonta yar ee ku lugta lahayd dhacdada "Charlie" ay halis ku jirtay ayna waajib ahayd inay jawaab ka hesho dhammaan doomaha aagga marayay. Doonta ugu dhawayd "Charlie" xilliga baaqa wuxu ahaa markabka dagaalka ee Faransiiska Flamant, oo ay wateen Ilaalada Xeebaha Faransiiska.

Sida ku cad caddayn Baaritaanka ay siiyeen Ilaalada Xeebaha HM, Flamant waxay qiyaastii u jirtay 3 nootikal mayl -- ama 15 daqiiqo -- halka baaqa laga soo diray. Taas beddelkeeda, doonta Ciidadama Ilaalada Xuduudaha, Valiant, waxay jirtay 9 nootical mayl ama 40 daqiiqo. Haddana Flamant kamay jawaabin Baaqa gurmadka.

Ficiladayda iyo dayaceed waxa laga sugayaa, sidaan horay u soo xusay, Baaritaanka ay wadaan maamulka Faransiiska. Hase ahaatee, marka la fiirsho siday ugu dhowayd goobta

dhacdada "Charlie" xilliga Baaqa Gurmadka iyo xaqiiqada in doonta yari markaas ishaysatay, haddii Flamant u tagto doonta "Charlie", nafo badan oo kale-- iyo hadday doonto dhammaan nafaha-- waa la badbaadin karay.

Arrin kale oo la xiriirta raadinta iyo samatabixinta waxay la xiriirta go'aanka Ilaalada Xeebaha HM ee habeenkaas. Warbixintu waxay ka bixisay fiirin faahfaahsan. Waxaan qirayaa in Ilaalada Xeebaha HM caqabado kala kulmeen siday la isku hallayn karo uga heli lahaayeen doomaha yaryar ee isku dayaya inay ka soo gudbaan Gacacanka, inkastoo ay ka warqabeen dhibaatadaas ka hor Noofeembar 2021.

Bilowgii shiftiga habeenka 23ka Noofeembar ee sannadkaas, Ilaalada Xeebaha HM waxa caqabad ku ahaa helista xog waqtiyaysan oo la xiriirta doomaha yaryar ee ka soo gudbaya Qooriga Dover. Wax duulimaad kormeer ah lama dirin habeenkaas cimilada darteed. Macluumaadka ay ay soo gudbiyeem maamulka Faransiiska way daaheen oo xaddidnaayeen mana jirin cid ka jawaabta Baaqa Gurmadka ee ay soo gudbiyeen doomaha Aagga ka dhowaa.

Hase ahaaatee, markii Ilaalada Xeebaha HM Iskuduwaha Hawlaha ee Dover ka helay wicitaankii u horreeyay dhacdada "Charlie" sacadu markay ahayd 1.48 habeenimo, wuxu rumaysnaa, waana saxe, inay tahay xaalad u baahan gurmad degdeg ah.

Inkastoo tani jirtay, iyadoo weli liddi ku ah nidaamyada

shaqo ee dejisan, Ilaalada Xeebaha HM dedaalo ku filan may gelin inay macluumaad buuxaan ka qabtaa wicitaanadii xigay,oo macluumaadka doonta yar laga helay looma qaadin siday tahay. Ilaalada Xeebaha HM waxay lumiyeen fursadaha ay ku qaban lahaayeen macluumaadka goobta doonta intii wicitaanadu imanayeen.

Fursadaha dheeraada ayaa lagu lumiyay raadinta ay Ciidamda Ilaalada Xeebaha qaadeen iyagoo wata Valiant iyo helikabtarta R163. Midkoodna laguma wargelin in doonta yar degayso ama inay dhici karto in dad biyaha ku jiraan. Midkoodna lama siin xogta raadinta oo buuxda. Xaqiiqatan, Ilaalada Xeebaha HM qorshe raadineed rasmi ah umay samayn dhacdada "Charlie".

Dadkii doonta saarnaa laguma soo helin hawlgalkii raadinta iyo samatabixinta Ingiriiska. Xaaladda jawiga ee habeenkaas jawaab kala dhiman bay ka bixinayaan su'aasha sababta dadkii saarnaa doonta yar qofna looga heli waayay. Sida si faahfaahsan loogu sharraxay warbixinta, cilladahaas ka jiray hawlgalka raadinta iyo samatabixinta waxay lala xiriirin karaa Ilaalada Xeebaha HM. Lama xiriiraan kabtanka ama shaqaalaha Valiant helikabtarta R163. Taasina, qaabka ugu kooban marka loo dhigo, waa hawlgalkii raadinta iyo samatabixinta ee habeenimadii dhacay.

Dabadeedna si degdeg ah ayaa hawlgalka loo soo gabagabeeyay subaxnimadii 24-kii Noofeembar 2021. Sida lagu sharraxay warbixinta, Ilaalinta Xuduudaha ee Dover waxay si khaldan u aqoonsadeen doontii labaad ee ay soo qaadday Valiant inay tahay doontii "Charlie". Tan waxay sameeyeen iyadoo ay jirtay iskhilaaf muuqda oo u dhexeeya macluumaadka "Charlie" iyo ka doonta labaad. Sababaynta ka dambeysa go'aankan laguma diiwaangelin qoraal ahaan oo khaladaad way ka jireen xog kaydinta. Fashilka xog kaydinta waxay keentay in shiftiga maalinimada dhacdada u qaateen in dhacdadii "Charlie" la xalliyay. Markaas Ilaalada Xeebaha HM may qaadin wax tallaabo ah oo ay ku raadinayaan dadkii weli iyagoo nool biyaha ku jiray intii u dhexaysa 6.46 subaxnimadii hore, markaas oo Valiant soo gabagabaysay raadinteeda, iyo wax lix saacadood ka dib markii 12.57 duhurnimo, markaas Ilaalada Xeebaha ay doon kalluumaysi u soo sheegtay maydad ay ka heshay biyaha Faransiiska.

Haddii kale raadintu way sii socon lahayd illaa waqtiga ugu badan ee qof badbaadi karay sida ay xisaabiyeen Ilaalada HM, oo sidaas darteed raadintu way socon lahayd ugu yaraan guud ahaan maalinta 24 Noofeembar 2021. Masaafada la arkayo iyo xaaladaha habeenimo midkoodna raadinta caqabad kumay noqdeen. Helikabtartu si fudud ayay hawada uga arkays maydadka galabnimadaas. Haddii raadinta dadka nool si fiican loo wadi lahaa maalintaas, oo ay ku jiraan

saacadaha maalinimo, nafo badan ayaa la badbaadin lahaa.

Sida falanqaynta warbixintu caddaynayso, qaladaadka Ciidama Ilaalada Xeebaha HM waxay ahaayeen kuwo dabciyan nidaami ah.  Si khaas ah, waxay la xiriiraan: (i) cadaadiska xad-dhaafka ah ee saarnaa shaqaalaha Ilaalada Xeebaha HM ee ee gacanta ku hayay baadi-goobka iyo badbaadinta doonyaha yaryar, kuwaas oo la geliyay xaalad aan loo dulqaadan karin shaqaale yari iyo nusqaamo kale awgood; (ii) maqnaanshaha kormeer hufan oo lagu sameeyo shaqaalahaas; (iii) xaddidnaanta nidaamka shaqada ee fogaanta kaas oo ahaa hawlgal loogu talagalay in lagu caawiyo iyaga; iyo (iv) tan afraad, aaminsanaanta ka dhex jirtay Ilaalada Xeebaha HM ee ahayd in dadka soo wacaya ee saaran doonyaha yaryar ay inta badan buunbuuniyaan xaaladdooda dhibaato.

Ugu dambeyntii waxaan eegaya talooyinka warbixinta. Marka hore aan qiro in tan iyo dhacdadii Noofeembar 2021 wax badan hagaageen marka laga fiirsho hantiyaha Ilaalada Xeebaha HM u diyaarka ah.  Intaas waxa dheer, sida aan ku qoray qaybta ugu dambeysa ee warbixinta, horumar baa laga sameeyay dhaqangelinta soojeedinaha saddex warbixinta laga sameeyay, oo kala ah MAIB, oo aan horay u soo xusay, qiimeyn madax-bannaan oo ay sameeyeen Ciidamada Ilaalada Xeebaha Maraykanka, Luulyo 2023, iyo qiimeyn gudeed ay sameeyeen Ilaalada Xeebaha HM, kaasoo qabyo ahaan u

soo baxay bishii May ee 2024.

Dhammaan saddexda warbixinoodba waxa ku jira, talo soojeedino la aqbalay oo la dhaqangeliyay. Hase ahaatee, waxa jira kuwo la diiday, kuwaas oo ay ka mid yihiin soojeedino ay soo gudbiyeen Ilaalada Xeebaha Maraykanka. Intaas waxa dheer, qiimeyn gudeedka ay sameeyeen Ilaalada Xeebaha Ingiriiska may soo gudbin fashillo badan oo Baaritaanku daaha ka rogay.

Cutubka u dambeeya ee warbixinta, waxaan ku xusay soojeedimahayga. Kuwani waxay si buuxda u tixgelinayaan horumarka la sameeyay tan iyo markii shilku dhacay. Soojeedimahan waxay u qaybsan yihiin afar qaybood. Waxa loogu talagalay, si waafaqsan Xilalka iyo Waajibaadka baaritaanka , in lagu yareeyo khatarta dhacdo tan la mid ah ku dhacdo mustaqbalka. Qaybaha waxay kala yihiin sidan:

(1) Talooyin la xiriira hawlgallada baadi-goobka iyo badbaadinta ee gudubka doonyaha yaryar;

(2) Talooyin la xiriira hawlgallada baadi-goobka iyo badbaadinta ee dhacdooyinka khasaaraha badan geysta guud ahaan;

(3) Talooyin lagaga qabanayo arrimaha qaabdhismeedka iyo xeer-dejinta ee la xiriira hawlaha baadi-goobka iyo badbaadinta badda; iyo

(4) Talo guud oo ku saabsan baahinta macluumaadka la xiriira hirgelinta waxyaabaha ay MAIB ku talisay warbixinnadooda baaritaanka, taas oo aan horay u tilmaamay.

Hadda, faahfaahinta soojeedimaha oo buuxa waxa laga helaya cutubka 17 ee warbixinta. Sida aan muujiyay, yoolalka Baaritaanka waxa ka mid ah in la yareeyo khatarta shil dad badani ku dhinto oo la mid midkii 23-da illaa 24-ta Noofeembar 2021 uu mustaqbalka dib u dhaco. Talooyinka aan soo jeediyay waxa loo dhigay inay yareeyaan tan. Hase ahaatee, waxay khatartaas yareyn karaan keliya haddii la dhaqangeliyo.Maadaama aysan jirin hab uu Baaritaanku kula socon karo hirgelinta talooyinkooda ka dib marka warbixinta la baahiyo, waxaa muhiim ah in Dawladdu ay qaadato mas'uuliyaddaas iyadoo si furan dadweynaha ugu soo bandhigaysa horumarka laga gaaray hirgelintooda.

Sida aan warbixinta ku sheegay, diyaar baan u ahay inaan dawladda iyo cidwalba uga taageero hawsha qaabkasta oo habboon. Soo gudbinta horumarka la sameeyya iyo in korjoogtayn madaxbanaan la sameeyo wa habka kalsoonida dadwaynaha iyo ku kalsoonaanta Baaritaanka ee hannaanka lagu joogtayn karo.

Ugu dambeyntii, sida aan ararta ku soo sheegay, dhaqanka doomaha yaryar ee soo gudbaya waa in uu soo gebageboobo. Marka laga yimaado sababa kale, waa lagama maarmaan in laga hortago dhimasho nafo kale oo dheeraad ah. Soo raacista doon yar, aan badda ku habboonayn oo buux dhaafsan si aad uga gudubto mid ka mid ah marinada badda ee ugu mashquulka badan waa khatar aad u wayn.

Aad baad u mahadsan tihiin.